Ku socota waalidka/masuulka
carruurta Sanadaha 4 ilaa 10 ah

Tixraacayaga: Tixraacaaga:
Hilde Brendehaug Hugaas

Meesha: Bergen
25.01.2023

## Marti qaadka ardayda dugsigu inay ka soo qayb galaan xog ururinta xoog sheegashada, saaxiibtinimada iyo fayo qabka.

Warqaddan waxay ku socotaa waalidka/masuulada oo ku wargelinaysaa in dhammaan ardayda Sanadaha 4 ilaa 10 lagu marti qaaday inay ka qayb galaan xog ururinta waxa ku saabsan u xoog sheegashada, saaxiibtinimada iyo fayo qabka xaga dugsiga.

**Ujeedada:**
Xog ururinta waxay tahay qayb ka mid ah shaqada dugsiga ee samaynta deegaan wanaagsan badbaado ah oo dugsiga ah ee dhammaan ardayda xaga dugsiga, si raacsan laynka Cutubka 9A ee Xeerka Waxbarashadda Noorwayjiyaanka iyo Axdiga Qaramada Midoobay ee Xuaquuqda Ilmaha. Xog ururintu waxya siin doontaa dugsiga macluumaad qiime leh oo ku saabsan fayo qabka ardayda iyo badbaadada xaga dugsiga. Waxay sidoo kale siin doontaa tilmaanta sida wanaagsan ee dugsigan ugu guulaysanayo shaqada ku lidka ah u xoog sheegashada. Intaa waxa dheer xogta la urushay waxaa sidoo kale loo isticmaali doonaa cilmi baadhida ku saabsan u xoog sheegashada iyo deegaanka dugsiga, oo in dheeraad ah waxay horumarisaa tallaabooyinka gaarka ah ee lagu daray barnaamijka ka hortagga u xoog sheegashada ee Olweus.

Mulkiilaha dugsiga waxa uu ka masuul yahay qabashada xog ururinta Olweus xaga dugsiga, marka NORCE ay ka masuul tahay cilmi baadhida.

**Kumaa ka masuul ah mashruuca cilmi baadhida?**
Xarunta Gobolka ee Ilmaha iyo Caafimaadka Maskaxda Dhalin yarada iyo Daryeelka Ilmaha (RKBU Vest) waxa uu ka masuul yahay qabashada xog ururinta wada shaqaynta la leh mulkiilaha dugsiga. RKBU Vest waxay ka qayb tahay cilmi baadhida, wax barida iyo faafinta aqoonta, dhammaan leh ujeedada sare u qaadista caafimaadka maskaxda ee carruurta iyo dadka dhalin yarada ah. Dugsiyadu waa kooxaha goobaha muhiimka ah gudaha dedaalka Xarunta si looga hortaggo, loo soo aqoonsado oo wax looga qabto u xoog sheegashada iyo xad gudubyada kale ee carruurta dhexdeeda iyo dhalin yarada. RKBU Vest waxay qayb ka tahay Xarunta Cilmi baadhida Noorwayjiyaanka (NORCE)

AS, taas oo ka masuu ah mashruuca iyo shaqada cilmi baadhida. NORCE waa mid ka mid ah machadyada cilmi baadhida madaxa banaan ee ugu wayn Norway.

**Maxaa ilmahaaga loo waydiinayaa inuuka qayb galo?**
Dugsiyada bilaabay *Barnaamijka Ka hortagga U xoog sheegashada Olweus* waxaa loo bixiyaa sidii fursada si loo qabto xog ururinta ardayga sanad kasta. Tani waxay ku habboon tahay ardayda ugud hawaan 105 dugsiyada hoose iyo kuwa hoose dhammaan wadanka. Barnaamijka Ka hortagga U xoog sheegashada Olweus waxay ujeedadiisu tahay yaraynta u xoog sheegashada jirta ee ardayda iyo in laga hortago u xoogsheegashada mustaqbalka. Shaqada in laga hortaggo u xoog sheegashada gudaha dugsiyada waxay u baahan tahay dedaal muddo dheer oo nidaamsan. Shay kale oomuhiim ah shaqadan waa ka warhaynta horumarka dugsi kasta dhexda xog ururinta ardayga ee sanadlaha ah.

Waxaanu habbaynaa xogta ku saabsan ilmahaaga sababtoo ah mashruuca cilmi baadhida waxaa loo arkaa inay tahay danta guud, tixraaca Sharciga Ilaalinta Xogta Guud (GDPR), Qodobka 6(1)(e) iyo Qodobaka 9(2)(g). Axdiga Qaramada Midoobay ee Xaquuqda Ilmahu wax auu sheegayaa in danta ugu wanaagsan ilmaha ay ahaanayso ka firisasahada muhiimka ah dhammaan falalka khuseeya carruurta. Cilmi baadhidu waxay muujinaysaa Barnaamijka Olweus inay yarayn karto u xoog sheegashada gudaha dugsiyada (Barnaamijka Ka hortagga U xoog sheegashada Olweus (OBPP) – barnaamijka dugsiga oo dhan ee ku lidka ah dhaqanka bulshadda ku lidka ah (2aadd ed.) | Ungsinn https://ungsinn.no/post_tiltak_arkiv/olweus-programmet-obpp-2-utg/) iyo natiijooyinka ka soo baxay xog ururinta Olweus waxay muhiim u tahay dugsiyad amarka ay noqoto in la awoodo in la wanaajiyo tallaabooyinka faa'iidada ardayda.

**Maxay ka qayb galka ilmahaagu ku lug leedahay?**
Xog ururintan waxaa la qabtaa muddada saacdaha dugsiga. Ardaydu waxay isticmaalaan PC ama kiniin marka laga jawaabayo xog ururinta. Wakhtiga ardaydu ku qaadato ku qaadato ka jawaabida xog ururinta waxay ku xidhan tahay da'da iyo aqoonta ahriska, laakiin guud ahaan waxay qaadataa inta u dhexaysa 20 ilaa 40 daqiiqo in laga jawaabo foomka oo dhan.

Ilmahaaga *lama* waydiin doono inuu sheego magaciisa ama keeda ama xogta gaarka ah ee si toos ah looga aqoonsan karo xog ururintan. Marka la soo gelayo xog ururinta, ilmahaagu keliya waxaa la waydiin doonaa inay bixiyaan sinjigooda, sanadka waxbarashadda, iyo magaca dugsiga.

Ardaydu waxay hagitaanka ka heli doonaan macalinkooda ka hor inta aanay bilaabin ka jawaabida xog ururinta. Foomku waxa uu ka kooban yahay su'aalaha ku saabsan fayo qabka xaga dugsiga, tirada saaxiibada ah ee fasalkooda iyo inta jeer ee u xoog sheegashadu ka dhex dhacdo ardayda. Waxa jira su'aalo ku saabsan noocyo kala duwan oo u xoog sheegasho ah tusaale isticmaalka luqadda xun iyo naanaysaha, laga reebo ardayda ciyaarta ama hawlaha kale, faafinta beenta, laadista, riixida, dagaalka, burburinta waxa ardaygu haysto ee kuwa kale iyo u xoog sheegashada dhijitaalka ah. Intaa waxa dheer, xog ururinta waxay isku daydaa inay daaha ka qaado halka dhismaha dugsiga falalkan xun ay ka dhacaan, iyo haddii ardaydu ay uga warbixiyeen dhacdooyinka

waalidka, macalimiinta, walaalaha ama saaxiibada. Xog ururinta su'aalaha waxaa lagu arki karaa RKBU bogga internatka ee Vest Spørreskjema (rkbu.norceresearch.no).

Ardayda ku jirta Sanadka 4 waxaa la waydiin doonaa su'aalo ka yar ardayda ku jirta Sanadada 5 ilaa 10.

**Ka qayb galku khasab maaha**
Waa go[aanka ilmahaaga, iyaddoo adiga lagula tashaniyo sidii waalidkood/masuulkood, haddii uu ka qayb gelayo ama aaanu ka qayb galayn xog ururinta. Waad la xidhiidhi kartaa dugsiga haddii *aanad* doonayn ilamahaagu inuu ka qayb galo. Uma baahnid inaad bixiso sababta ilmahaagu aanu uga qayb galayn. Ilmahaagu sidoo kale waa uu ka noqon karaa xog ururinta ka dib bilaabida. Ardayda aan ka qayb qaadan xog ururinta caadi ahaan waxaa la waydiin doonaa inay qabtaa shaqo dugsi muddada wakhtiga xog ururinta la qabanayo. Si kastaba ha ahaatee, dugsiyada gaarkood waxay go'aan uga gaadhaan sida loo habbayn karo.

**Xogta ilaalinta ardayda — sida aan ku kaydino oo ku isticmaalno macluumaadka ka yimid xog qaadista**
RKBU Vest waxay keliya isticmaali macluumaadka laga soo urursahy ardayda ee ujeedooyinka aanu kugu wargelinay adiga ee ku saabsan warqaddan. Waxaanu u habbaynaa macluumaadka si qorsoodi ah oo waafaqsan xeerka ilaalinta shuruucda gaar ahaanshaha.

RKBU Vest waxay isticmaashaa Nettskjema (Jaamacadda Oslo) oo leh kayd amni ah oo ah Adeegyada Xogta Xasaasiga ah (TSD) sidii goobta xog ururinta. Marka dugsigu dhammeeyo xog ururinta, waxaaloo diraa warbixinta caadiga ah ka dib RKBU Vest ay xaqiijiso inaan ardayda si aan toos ahayn loo aqoonsan.

Cilmi baadhidu kuma xidhna xogta ka timid dugsi gaar ah, laakiin waxay ku xidhan tahay natiijooyinka laga soo urursahy dugsiyo dhowr ah. Nariijooyinka dugsiyada gaar ahaaneed lama daabici doono. Jawaabaha ka soo baxay ardayda shakhsi ahaan waxaa la qarin doonaa magaca marka la daabaco ama qaababka kale ee faafinta ah.

**Maxaa ku dhacay macluumaadka marka la urusho?**
Xogta waxaa lagu ururin doonaa xog ururinta sanadlaha ah waxaa lagu kaydiyay xaga TSD (https://www.uio.no/tjenester/it/forskning/sensitiv/mer-om/) kaas oo ay ku hawl gasho USIT xaga Jaamadacadda Oslo, iyo kaas oo NORCE AS ay leedahay heshiiska habbaynta xogta. TSD waxay ku salaysan tahay Xeerka Dhaqanka ee amniga macluumaadka iyo ilaalinta xogta gudaha daryeelka caafimaadka iyo adeegyada daryeelka (Normen), taas oo xaqiijisa in macluumaadka amniga ee ku saabsan qarsoodiga, wada jirka iyo helitaanka la ilaaliyo. Magaca dugsiga waxaa lagu beddeli karaa xogta faylka, iyo heerka dugsiga furaha beddelka waa loo sameeyo kan. Furaha beddelka ishaarida sidoo kale waxaa lagu kaydiyaa serfar isku mid ah oo amni ah. Keliya tiro yar oo shaqaalaha xaga RKBU Vest ay heli karaan serfar amni ah, oo dhammaan la marinayo waajibka qarsoodiga.

Xogta waxaa loo isticmaali doonaa warbixinta lagu bixiyay dugsiyada markaas waxay hirgelin karaa tallaabooyinka la xidhiidha sida xoog sheegashada ay u samaysanto muddo ka dib. Shaqadayada cilmi baadhida xaga RKBU Vest, waxaanu aad u rabnaa inaan xog qaadno sida horumarka dhammaan dugsiyada ee bara Barnaamijka Olweus, si loo soo gebagabeeyo waxa ku saabsan saamaynta barnaamijka u xoog sheegashada gudaha dugsiyada. Macluumaadka NORCE ay u isticmaasho ujeedooyinka cilmi baahida waxaa la qarin doonaa magaca 2042.

**Xuquuqda ka qayb galayaasha mashruuca**
Si waafaqsan Sharciga Ilaalinta Guud ee Xogta (GDPR), ka qayb galayaasha mashruucu waxay xiiseeyaan tiro xuquuqo ah (tixraac. Qodobada 12-22) – Xeerka la xidhiidha habbaynta xogta gaark aah (Xeerka Xogta Gaarka ah) – CUTUBKA III Xuquuqda Xogta Mowduuca – Lovdata. RKBU Vest waxaa waajib ku ah inay ku wargeliso ka qayb galayaasha mashruuca wax ku sabasan sida ay u habbayso xogta gaarka ah iyo in awood loo siiyo iyaga inay ku dhaqmaan xuquuqdooda.

- helaan gelida nooc kasta oo xogta gaarka ah oo laga diiwaangeliyay oo ku saabsan ardayga.
- sax xogta gaarka ah ee ku saabsan ardayga
- tirtir xogta gaarka ah ee ku saabsan ardayag.
- diidista habbaynta xogta gaarka ah ee khuseya ardayga
- usoo gudbiyaan cabashada sarkaalka ilaalinta xogta ama Masuuliyiinta Ilaalinta Xogta Noorwayjiyaanka ee ku saabsan habbaynta xogta gaarka ah.

Xuquuqahu waxay la xidhaadhaan ilaa inta xogta gaar ahaanshaha ah la habbaynayo iyo marka ay suuragal tahay in la aqoonsado ardayga diiwaanka gashan qaab amni ah. Ardayda *laquma*diiwaaniyo si toos ah macluumaad la aqoonsan karo sida magaca, iimaylka ama lambarka aqoonsiga qaranka gudaha mashruucan. *Keliya* macluumaadka hore sida magaca dugsiga, sanadka waxbarashadda iyo sinjiga diiwaan gashan. Sharci guud ahaan, tan macnaheedu waxa weeye inaanay suuragal ahayn in la aqoonsado jawaabaha ardayda gaarka ah. Haddii ay noqoto inay suuragal tahay in la aqoonsado jawaabta ardayga gaarka ah, waxaanu ka caawin doonaa xaqiijinta in shuruudaha la buuxiyo ku saabsan xuquuqda sare lagu sheegay.

**Waxa na siiya qaabka sharciga ee habbaynta xogta gaarka ah ee ku saabsan ilmahaaga?**
Iyaddoo ay metelayso NORCE AS, Sikt Personverntjenester waxay qiimaysay in habbaynta xogta gaarka ah ee mashruucan ay u hogaansanto sharciga ilaalinta xogta.

**Ma jeclaan lahayd macluumaad badan?**
Maclumaadka dheeraadka ah, fadlan la xidhiidh:

- Maareeyaha mashruuca Hilde Brendehaug Hugaas xaga RKBU Vest
  Iimaylka: Hihu@norceresearch.no Tel. 56 10 72 75
- Kaaliyaha Cilmi baadhida Mariann Eidsør at RKBU Vest
  Iimaylka: olweusprogrammet@norceresearch.no Tel.: 56 10 76 52

- Sikt Personverntjenester
  Iimaylka: kontakt@sikt.no
- Sarkaalka ilaalinta xogta ee NORCE AS
  Iimaylka: personvernombud@norceresearch.no

## Kii daacada kuu ahaa,

**Ann Heidi Nebb**

Madaxa Xarunta/Khabiirka Cilminafsiga

RKBU Vest
NORCE

**Hilde Brendehaug Hugaas**

La taliyaha Sare
Maareeyaha Mashruuca
RKBU Vest
NORCE